

Seattle Fire Prevention Division

220 3rd Avenue South

Seattle, WA 98104-2608 Iimaylka: permits@seattle.gov



Teendhooyin iyo Kuleyliyayaasha loogu talagalay Cuntada Dibada lagu qaato iyo Hawlaha: Tilmaamaha Badqabka iyo Ruqsada SFD v04282025

Teendhooyinku waxay noqon karaan khatar haddii uu dab qabsado ama soo dhacaan. Sababtan awgeed, teendhooyinka waaweyn waxaa xakameeya Xeerarka Dabka iyo Dhismaha. Kuleyliyayaasha sidoo kale waxay keeni karaan khataro, haddii kuleylku uu bixiyo propane/Gaaska Dabka Lagyu Shitpo (Liquefied Petroleum Gas, LPG), naaftada, ama korontada. Dhukumiintigani waxa uu soo bandhigayaa soo koobida shuruudaha xeerka iyo sidoo kale habka loo habeeyey ruqsad bixinta ee gaarka ah iyo xeerarka la dhaqan galiyay inta lagu jiro aafada COVID iyo soo kabashada.

TEENDHOOPYIN

Waxaad u baahan tahay Ruqsada Seattle Fire Department (SFD) si aad u isticmaasho teendho ku meel gaar ah, dabool, ama qaab dhismeed hawo taageerto haddii:

- Qaab-dhismeedku wuxuu ka weyn yahay 400 fiit oo isku wareeg ah wuxuuna leeyahay hal ama in ka badan oo darbiga ah; AMA,
- Qaab-dhismeedku wuxuu ka weyn yahay 700 fiit oo isku wareeg ah oo aan lahayn darbiga (shiraaca saqaf ah kaliya).
- Waxaad haysataa laba ama in ka badan oo yaryar oo teendho ah oo saqafka keliya ah kuwaas oo la dhigay geeska in ka yar 12 cagood oo isu geyntoodu ka weyn tahay 700 fiit oo isku wareeg ah.

Ruqsada waxaa ku jira shuruudo ay tahay inaad raacdo oo ku saabsan alaabta teendhada iyo rakibida si aad ugu hoggaansanto shuruudaha badqabka ee xeerka dabka. Ruqsadu waxay shaqaynaysaa 28 maalmood. Haddii teendhadaadu la kulanto ama dhaafto xadka cabbirka sare oo la isticmaali doono in ka badan 28 maalmood, ka dib markaad hesho ogolaanshaha teendhada ku meel gaadhka ah ee SFD, waxaad kala xiriiri kartaa ruqsada Seattle Department of Construction and Inspections 206-684-8850. Shiraacyada ayaa sidoo kale u baahan ogolaansho Seattle Department of Construction and Inspections (SDCI) mana maamusho SFD.

Hubi in Teendhadaada uu Ansixi karo Maareeyaha Dab-demiska Haddii aad iibsanaayo teendho ka weyn 400 fiit oo laba jibaaran, fadlan hubi inay buuxisay heerarka dib u celinta ololka ee xeerka dabka (eeg xaaladda ruqsada #8 ee bogga ugu dambeeya). Waxaa lagaaga baahan doonaa inaad aqbasho mas'uuliyada iyo mas'uuliyada rakibitaanka saxda ah ee teendhada heerarkii warshadaha iyo/ama tilmaamaha rakibida soo saaraha. Teendhooyinka ku meel-gaarka ah waa in aan la degin xiliyada barafka ama barafku urursan yihiin ilaa loogu talagalay in si buuxda loo raro qaab-dhismeed sida Xeerka Dhismaha Seattle. Teendhooyin yaryar waa in la saaraa inta lagu jiro ururinta barafka dhulka fariista iyo barafka iyo dhacdooyinka dabayshu. Teendhooyinka laga kireeyo shirkad kiro teendho ah oo sumcad leh waxay buuxin doontaa heerarka xeerka dabka oo shirkadda teendhadu waxay qaadan doontaa mas'uuliyadda rakibida habboon.

Miyaan doortaa Teendho Darbi la'aan ah? Sababaha hawo-qaadishada, inta lagu jiro cudurka faafa, xayiraadaha dawladda ayaa mararka qaarkood u baahday eber, hal, laba ama ka badan darbi ah. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad midan tixgeliso markaad iibsanaayo ama kiraynaayo teendho, maadaama aan la garanayn in kala duwanaanshaha mustaqbalka ay sababi doonaan soo noqoshada xayiraadahaas.

Intaa waxa dheer, waxa kale oo jira saamaynta xeerka dabka ee doorashada teendho leh ama aan lahayn darbiyo: Haddii teendhadaadu aysan lahayn darbiyo, waxaad u baahan tahay kaliya ruqsada SFD haddii teendhadaadu ka weyn tahay 700 fiit oo isku wareeg ah, ama aad leedahay teendhooyin isku garab yaala oo isaga 12 fiit oo guud ahaan ka badan 700 fiit oo isku wareeg ah. Si kastaba ha noqotee, haddii aad darbiyo ku darto teendhadaada, teendhooyinka yaryar waxay u baahan doonaan ruqsada SFD sidoo kale. Haddii teendhadaadu leedahay darbiyo, ruqsad ayaa looga baahan yahay teendhooyinka ah 400 fiit isku wareeg ah ama ka weyn. Teendhooyinka loo isticmaalo Suuqyada Beeralayda ayaa leh shuruudo kala duwan, fadlan ka eeg shuruudaha ruqsada 2500-FM halkan:

<https://web.seattle.gov/sfd/permitsearch/SearchbyAllPermit.asp>.

Teendhooyin iyo Kuleyliyaasha loogu talagalay Cuntada Dibada lagu qaato iyo Hawlaha: Tilmaamaha Badqabka iyo Ruqsada SFD

Intee in u jirta Dhisme ayaa Teendho laga Dhisi karaa? Tusaale ahaan, Teendhooyinka Geesaha Miisaska Cuntada SFD guud ahaan waxay u baahan tahay dib u dhigid inta u dhaxaysa teendhooyinka iyo dhismayaasha ugu yaraan 12 fiit.

Waa maxay Shuruudaha Ruqsada Buuxa ee Teendhada Ku meel-gaarka ah? Waxaad ka tixraaci kartaa shuruudaha ruqsada teendhooyinka websaytka. Halkan ka eeg taxanaha ruqsada 3201:

<https://web.seattle.gov/sfd/permitsearch/SearchbyAllPermit.asp>.

KULAYLINTA IYO NAL GALINTA BANAAKA

Propane (LPG) iyo kuleyliyaasha naaftada ku shaqeeya waxay u baahan yihiin ruqsad Taangiyada Shidaadka looma Ogola Gudaha Teendhada. Tani waxay la macno tahay kuleyliya "maashruumka" waxaa loo ogol yahay meel 10 fiit u jirta teendhooyinka, laakiin waa ka mamnuuc teendhooyinka dhexdooda. Kuleyliyaasha qaabka "Maas-cagalayda" u samaysan ee hawo ku afuufa teendhada hoosteeda dibadda waa la oggol yahay waxaana badanaa laga helaa shirkadaha kiraynta teendhada. Taangiga shidaalka waa in ugu yaraan 10 fiit u jirta teendhada lagana baxo waana inaad haysataa 2A-40BC dab-damiska.

Haddii aad kiraysato LPG/propane ama kuleyliya naaftada shirkad kireysta teendho, shirkadaas badanaa waxay yeelan doontaa ogolaanshaha kuleyliya propane/naaftada SFD ee loo baahan yahay, uma baahnid ogolaansho dheeri ah.

Waa inay sidoo kale bixiyaan dab-damisyada loo baahan yahay. Haddii aad iibsanaayo kuleyliyaasha LPG/propane ama naaftada, waxaad u baahan doontaa ruqsada SFD.

SFD waxay soo saartaa ruqsad kuleylka Propane/LPG ku meel-gaarka ah (koodhka ruqsada 8207) iyo ogolaanshaha naaftada (koodhka ruqsada 1102) si loo daboolo baahiyahaaga kululaynta ee kala duwan.

Kuleyliyaasha korontada iyo Nalalka waa la ogol yahay dibadda iyo sidoo kale gudaha teendhada oo uma baahna oggolaansho gaar ah SFD. Si kastaba ha ahaatee, waa in lagu xiriiriyaa meel koronto oo la ogol yahay.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan kala xiriir Waaxda Ruqsada SFD permits@seattle.gov. Adeegyo tarjumaad ayaa diyaar ah. Fadlan haka waabin inaad la hadasho qof ku hadla luqadaada - kaliya noo sheeg luqadda iyo lambarka taleefankaaga.